



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 6, 2020-ka

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Acacia McGuire Anderson, Isku duwaha Employment First ee Gobolka

Ujeedada: Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka

Oktoobar waa [Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka](#)

(NDEAM), iyada oo sanadkani

hal haysku yahay “Kordhinta Helitaanka iyo Fursada.”

Marka la joogo ODDS, shaqada waa udub dhexaadka hawsheena si awood loo siiyo dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka si ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa.

Sanadkani wuxuu keenay caqabado badan oo qasbay isbeddelo ku yimaada nidaamyadeena adeeg, oo ay ku jiraan adeegyada shaqo. Daryeel bixiyayaal iyo hay'adaha maamulka kiiska oo badan ayaa raadinaya fikrado hal abuur leh oo xalal keena oo ah sida loo bixiyo adeegyo si ay dadka wali ugu taageeri karaan si badbaado leh inta lagu jiro COVID-19.

ODDS iyo Tababarka Dhaqancelinta (VR) ayaa martigelinaya dhacdo dhanka internet-ka oo ah qado iyo waxbarasho “lunch and learn” oo dhacaysa Talaadada, Oktoobar 13. Guddi khubaro oo ka tirsan Oregon ayaa ka wada hadli doonta fidrado cusub xalalka oo keena xalalka shaqada. Guddiga waxaa ka mid ah Trey Schneider, kaasi oo safarkiisii shaqo ku bilaabay tababar uu shaqada ku qaadanayay ee uu la lahaa Project SEARCH isaga oo hadda Kaaliyaha Takhasuska leh ee Taageerada Xafiiska ahaan uga shaqeeya Xafiiska Adeegyada Deegaanka ee Magaalada Portland. Mer Stevens oo ka socda Community Access Services, Laura Noppenberger oo

ka socota Eastern Oregon Support Services Brokerage, Pennie Hartley oo ka socota VR, iyo Anais Keenon oo ka socota City of Portland ayaa sidoo kale lagu soo bandhigi doonaa guddiga.

Fadlan nagala soo qayb gal laga soo bilaabo 1 galabnimo., Oktoobar 13, kaasi oo loogu talagalay wada hadalka guddiga iyo dabaaldega Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka. Iska diiwaan geli: <https://attendee.gotowebinar.com/register/2505314618931007502>

Is diiwaangelinta ka dib, waxaad heli doontaa email xaqiijin ah oo ka kooban macluumaadka ku soo biirista siminaar dhanka internet-ka ah 'webinar'.

Waxa farriintani ku lifaaqan waa warqad xayaysiis ah 'flyer' oo loogu talagalay dhacdada iyo kaarka warbaahinta bulshada oo la iskula wadaagi karo kanaaladaada. Si ballaaran wax ula wadaag!

Waad mahadsan tahay shaqadaada iyo taageerida dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,

Lilia iyo Acacia

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.